

Bronchoscopy

A bronchoscopy is a test to look at your airways and lungs. A small tube is put through your nose or mouth into your lungs. This test is used to check for lung disease or to remove mucous. A small piece of tissue may be removed and studied in the lab. This is called a biopsy.

An adult family member or friend needs to come with you to take you home after the test. It is not safe for you to drive or return home alone.

Arrive on time for your test. Plan on this test taking about 2 hours.

To Prepare

- Do not eat or drink anything, including water, after midnight before the test.
- If you are to take your medicines the morning of the test, take them with sips of water only.

During the Test

- You will wear a hospital gown.
- You sit in a chair or lie on a table during the test.
- An IV (intravenous) is put in a vein in your arm.
- You may be given some medicine to help you relax.

Baaritaanka dhuumeed ee Baroonkaha (*Bronchoscopy*)

Bronchoscopy waa baaritaan lagu fiirinayo marinnadaada hawada iyo sanbabada. Dhuun yar ayaa sankaa ama afka lagaa gelinayaa ilaa sanbabadaada. Baaritaanka waxaa loo isticmaalaa in sanbabada cudur looga baaro ama dheecaan laga soo saaro. Cad yar oo unug ah ayaa laga yaabaa in meesha laga soo saaro ka dibna lagu darso shaybaarka. Tan waxaa loo yaqaannaa dheecaan ka qaadid.

Xubin qof weyn oo qoyska ka tirsan ama saaxiib ayaa loo baahan yahay inuu kula yimaado. Ammaan kuuma aha in aad baabuur kaxeysid ama kaligaa guriga ku noqotid.

Waqtiga ku imow marka lagu baarayo. Qorsheyso baaritaankaanku inuu ilaa 2 saacadood qaadanayo.


Si aad isugu diyaarisid

- Waxna ha cunin hana cabin, marka lagu daro biyo, wixii ka danbeeya bartamaha habeenkii baaritaanka kahor.
- Haddii aad qaadanaysid qaar ka mid ah dawooyinkaaga subaxa baaritaanka, ku qaado kaliya kabashooyin yaryar oo biyo ah.

Waqtiga Baaridda

- Waxaad xidhan doontaa toobka/qamiiska isbitaalka.
- Waxaad fadhiisan doontaa kursi ama waxaad ku jiifsan doontaa miis waqtiga baaritaanka.
- IV (xididka gudhiisa) ayaa la galinayaa xididka gacanta.
- Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo xoogaa daawo ah si ay kaaga caawiso inaad is kala bixiso.


- Small pads are put on your chest to check your heart. For men, chest hair may need to be shaved.
- A blood pressure cuff is put on your arm. Your blood pressure and heart rate are checked often.
- A clip is put on your finger to check your oxygen level.
- You may be given oxygen to breathe during the test.
- Your mouth and nose are sprayed with numbing medicine.
- The doctor puts the tube into your nose or mouth. You may feel the tube in your throat or the need to cough. You will be able to swallow and breathe.
- Your doctor will be talking to you, but you should not talk during the test. This helps keep you from having a sore throat.
- The doctor removes mucous and a tissue sample if needed.
- The tube is then removed.



After the Test

- The nurse will check you often for about 1 hour after the test.
- Medicines given during the test will make you sleepy. You will need to have an adult family member or friend take you home for your safety.
- In about 2 hours, the numbing medicine wears off and you will be able to eat and drink.

- Cad yar oo koollo leh ayaa feedhaha lagaaga dhajinayaa si loo hubiyo wadnahaaga. Ragga, timaha xabadka ayaa laga yaabaa in loo baahdo in laga xiiro.
- Dhiig cabbiraha ayaa gacanta lagaaga xidhayaa. Cadaadiska dhiiggaaga iyo garaacidda wadnahaaga ayaa badanaa la hubin doonaa.
- Biin ayaa faraha lagaaga qaban doonaa si loo hubiyo heerka ogsijiinta.
- Waxaa laga yaabaa in ogsijiin lagu siiyo si aad ugu neefsatid waqtiga baaritaanka.
- Afkaaga iyo sankaa ayaa waxaa lagaaga buufin doonaa daawo kabuubiso ah.
- Dhakhtarku wuxuu tuubo kaa gelin doonaa sanko ama afka. Waxaa laga yaabaa inaad dareentid dhuunta oo hunguriga kaaga jirta ama aad u baahan tahay inaad qufacdid. Waxaad awoodi doontaa inaad wax liqdo ama neefsatid.
- Dhakhtarkaaga ayaa kula hadli doona, laakiin waa inaad hadlin waqtiga baaritaanka. Tani waxay kaa caawineysaa iney kaa ilaaliso in dhuuntu ku xanuunto.
- Dhakhtarku wuxuu soo bixinayaa sambal dheecaan iyo unug haddii loo baahdo.
- Ka dibna tuubada ayaa lagaa soo saarayaa.



Baaritaanka ka Dib

- Kalkaaliso ayaa badanaa ku hubin doonta hal saac baaritaanka ka dib.
- Daawooyinkii lagu siiyey waqtigii baaritaanku waxay kaa yeeli doonaan mid hurdeysan. Waxaad u baahan doontaa xubin qof weyn ah oo qoyskaaga ka tirsan ama saaxiib iney guriga kuu kaxeeyaan taasoo ammaankaagu ku jiro.
- Ilaa 2 saacadood, daawada kabuubisada ah way kaa baxaysaa waxaadna awoodi doontaa inaad wax cuntid oo wax cabtid.

- You may have a sore nose or throat, a hoarse voice or a cough. It is normal to cough up a small amount of blood.
- Test results are sent to your doctor. Your doctor will share the results with you.

Call your doctor if you have:

- A fever over 100.5 degrees F or 38 degrees C
- Other concerns

Call 911 right away if you:

- Have trouble breathing
- Have chest pain
- Are coughing up large amounts of blood

Talk to your doctor or nurse if you have questions or concerns.

5/2009. Developed through a partnership of The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.org.

Unless otherwise stated, user may print or download information from this website for personal, non-commercial use only. The medical information found on this website should not be used in place of a consultation with your doctor or other health care provider. You should always seek the advice of your doctor or other qualified health care provider before you start or stop any treatment or with any questions you may have about a medical condition. The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System and OhioHealth are not responsible for injuries or damages you may incur as a result of your stopping medical treatment or your failure to obtain medical treatment.

- Waxaa laga yaabaa inuu sanko ama hungurigu ku xanuuno, cod xabeeb leh, ama qufac. Waa caadi in la qufaco xoogaa dhiig ah.
- Natiijooyinka baaritaanka waxaa loo dirayaa dhakhtarkaaga. Dhakhtarkaagu wuxuu kula wadaagi doonaa natiijooyinka.

Dhakhtarkaaga wac haddii aad leedahay:

- Qandho ka sarraysa 100.5 darajo F ama 38 darajo C
- Walaacyo kale

Isla markiiba wac 911 haddii aad:

- Neefsashada dhibaato ku qabtid
- Aad feedho xanuun qabtid
- Aad qufacaysid xaddiyo badan oo dhiig ah

La hadal dhakhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad wax su'aalo ah ama walaac ah qabtid.

5/2009. Developed through a partnership of The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.org.

Unless otherwise stated, user may print or download information from this website for personal, non-commercial use only. The medical information found on this website should not be used in place of a consultation with your doctor or other health care provider. You should always seek the advice of your doctor or other qualified health care provider before you start or stop any treatment or with any questions you may have about a medical condition. The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System and OhioHealth are not responsible for injuries or damages you may incur as a result of your stopping medical treatment or your failure to obtain medical treatment.